



Guddoomiyaha Waxbarashadu wuxuu kormeer ballaaran ku sameeyey isaga isticmaalaya teknooliji casri ah oo fikrad guud ka siinaya dhismaha Dugsiga Sarre ee Grant

Guddoomiyaha Waxbarashada Guadalupe Guerrero wuxuu dhawaan booqasho ku bixiyey dhismaha Dugsiga Sarre ee Grant isaga oo arkay iskuulkii taariikhiga ahaa oo la burburiyey darbiyadiisii. Ka dibna wuxuu gashaday muraayado casriya ku tusaya mustaqbalka dhismaha iskuulku sida ay noqonayaan .

Markii uu fiirsanayey geesta Waqooyi ee iskuulka Grant, Guddoomiye Guerrero wuxuu daawanayey nidaamyo la farsameeyey oo sheegaya sida loo dhisi doono bilaha soo socda, kuwaasi oo ku tusaya xagga dambe ee dhismihii hore ee jiray. Maadaama ay dad badani ay yaqaanaan sawirada lagu farsameeyo kumbuyuutarka, in ay ka gedisan yihiin sawirada iyaga kumbuyuutarka lagu soo saaro oo sawirka dhabta ah ku tusay taasi oo lagama maarmaan ah. Marka aad daawaneyso guud ahaan sawirada aan xaqiiqda ku dhisneyn ee lagu farsameeyo kumbuyuutarka . Sawirada lagu soo saaro kumbuyuutarka ee dhabta ah, iyaga waxa aad fiirsaneysaa sawirada xaqiiqda ah oo lagu farsameeyey sawiro iyaga korka laga saaray.

Nidaamka teknoolijiga casriga ah ee kooxda mashruucu ay isticmaaleyso waa nooca kumbuyuutar lagu farsameynayo oo dhaba sidii uu uga caawin lahaa shaqaalaha dhismaha ka wado iskuulka Grant, iyada uu sahleysa in ay si dhib yar u sameeyaan dhinicii farsamada iyo nidaamkii biyaha/korontada dhismaha sidii ayna isku khilaafi lahayn dhismayaashii hore ee jiray. Waqtigan aan joogno, qandaraaslayaasha dhinaca farsamada waa kuwa kaliya ee teknoolajigan casrigan ah isticmaasha. Laakiin kooxda Dugsiyada Dadweynaha Portland(PPS) ee mashruucani waxa la rajeynayaa in teknoolaji noocan oo kale ah ay u isticmaali doonaan inta badan mashruucyada dhismaha ee mustaqbalka.

Dhameystirka burburinta dhismaha la dhisay sanadkii 1925 wuxuu bilaabmay bishii Juun 2017, iyada oo shaqada qeyb ka mid ahi ay dhammaad ku dhowdahay. Shaqada dib loogu cusbooneysiinayo dhismayaashii hore u jiray iyada oo lagu darayo qeybo kale oo cusub iyadauna waxa ay bilaabmayaan iminka, waxa ayna sii socon doonaa ilaa inta laga gaarayo xaggaaga sanadka 2019.

Wixii macluumaad dheeraad ah eek u saabsan shaqada ka socota iskuulka Grant, fadlan waxaad booqataa [shabakada mashruuca](#).

-David Mayne